# OGOW XUQUUQAHAAGA

## OGOW XUQUUQAHAAGA IYO ILAALINTAADA KU XUSAN SHARCIGA DAMBIYADA NACAYBKA

- **Ogow calaamadaha la raadinayo haddii aad tahay dhibbane dambi.** Ma ka dhacay dambigu xaflad ama isu-imaatin sida dibadbax ama bandhig, ama ma ka dhacay taariikh muhiim ah, sida fasax diimeed ama xuska dhacdo taariikhi ah? Ma isticmaalay qofka dembiga sameeyay aflagaado ama faallooyin fadeexadayn oo ku saabsan astaamahaaga gaarka ah sida midabka, jinsiga, doorashada galmada, diinta, ama xaaladda socdaalka ee la malaynayo?

- **Waxaad xaq u leedahay inaadan noqon dhibbane dambi iyadoo lagu salaynayo aqoonsigaaga dhabta ah ama la malaynayo, ama taageerada aad u hayso dadka leh aqoonsigaas.** Waxaad noqon kartaa dhibbane dambi nacayb haddii laguu bartilmaameedsaday sabab la xidhiidha aqoonsigaaga dhabta ah ama la malaynayo: Naafonimo jidheed ama maskaxeed; jinsi iyo galmo, oo ay ku jiraan aqoonsiga jinsiga iyo muujinta jinsiga; qaranimo, oo ay ku jiraan xaaladda socdaalka, jinsiyadda, ama goobta dhalashada; midabka ama qowmiyadda; diinta; ama doorashada galmada.

  Macnaha halkan, dhibbanaha waxaa ka mid ah, laakiin aan ku ekaan, qof, qoys, ama koox, iyo sidoo kale xubnaha bulshada ee wadaaga aqoonsi isla markaana isticmaala dhismo ama xarun wadajir ah, sida goob cibaado, hool shirar, xarun bulsho, ama hay'ad dadweyne ama gaar ah oo bulshadaas u adeegta. Sidoo kale waxaa ka mid noqon kara dadka aan xubnaha ka ahayn bulshadaas ee si lama filaan ah u noqday dhibbanayaasha fal dambiyeed oo ku salaysan eex lagu hayo bulshadaas. Hanjabaad rabshad ah, haddii qofka hanjabaadda sameynaya uu u muuqdo inuu awood u leeyahay inuu fuliyo hanjabaaddaas, waxay noqon kartaa dambi nacayb.

- **Waxaad xaq u leedahay inaad soo gudbiso warbixin hay'adda booliska ee deegaankaaga.** Haddii aad aaminsan tahay inaad noqotay dhibbanaha dambi nacayb ama aad goobjoog ka noqotay, waa inaad sida ugu dhaqsaha badan u soo sheegtaa booliska deegaanka, waxaadna xaq u leedahay inaad sidaas samayso adigoon shaacin xaaladdaada socdaalka. Waa muhiim in la hubiyo in hay'adaha booliska ay helaan macluumaadka lagama maarmaanka u ah sameynta baadhitaanka.

- **Waxaad xaq u leedahay inaad ka qayb qaadato oo lagugu wargeliyo kiis dambiyeedka ka dhashay dambi nacayb oo aad dhibbanaha ka tahay.** Kiis dambiyeedka inta lagu gudo jiro, waxaad xaq u leedahay inaad maxkamadda u sheegto sida dambigu noloshaada u saameeyay ka hor inta aan xukunka lagu dhawaaqin. Waxaad xaq u leedahay inaad ka hesho xeer-ilaaliyaha macluumaad gaar ah oo ku saabsan kiis dambiyeedka, oo ay ku jiraan, laakiin aan ku ekaan, macluumaadka soo socda: (1) Xabsiga la geliyey eedaysanaha; (2) Dacwadaha lagu oogay; (3) Dambiga lagu helay, (4)xukunka, iyo/ama xabsiga loo diray eedaysanaha; (5) iyo, haddii ay khuseyso, Taariikhda la qorsheeyey ee la sii deynayo eedaysanaha. Sidoo kale waxaad codsan kartaa inaad hesho ogeysiis macquul ah oo ku saabsan hawlgallada maxkamadda ee dadweynaha iyo habraacyada la xidhiidha xeer-ilaalinta ama sii deynta ka dib xukunka.

- **Waxaad xaq u leedahay inaad codsato amar isdifaacid ama amar ka-hortag si lagaaga ilaaliyo waxyeelo dheeraad ah.** Marka dacwad dambiyeed lagu oogayo sharciga kasta, dhibbanayaasha dambiyada nacaybka waxay xaq u leeyihiin amar maxkamadeed oo ka mamnuucaya wax kasta oo dhibsasho dheeraad ah inta uu socdo habraaca gal dacwadeedku. Xitaa haddii aan dacwad dambiyeed lagu oogin, waxaad codsan kartaa amar ka-hortag. Macluumaad dheeraad ah, fadlan booqo: https://selfhelp.courts.ca.gov/protective-orders ama xarunta caawinta ee maxkamaddaada deegaanka California. https://selfhelp.courts.ca.gov/self-help/find-self-help.

- **Waxaad xaq u leedahay inaad hesho tasdiiqinta fiisaha U ama T.** Waxaad xaq u leedahay inaad hesho tasdiiqinta fiisaha U ama T. Haddii aad tahay dhibbanaha dambi naceyb ama markhaati ka qayb qaadanaya baadhitaanka dambi naceyb, uma baahnid inaad ka jawaabto su'aalaha hay'adaha booliska ee ku saabsan xaaladdaada socdaalka, ilaa macluumaadkaas loo baahan yahay si loo shahaadeeyo fiisaha U ama T. Haddii aad tahay dhibbanaha ama markhaati dambi naceyb, hay'adaha booliska laguma qaban karo ama laguma soo sheegi karo xadgudub kasta oo socdaal ah, ama laguma wareejin karo hay'adaha socdaalka fadaraalka, ilaa lagu soo oogay ama lagu helay dambiyo ku xusan sharciga gobolka.

- **Waxaad xaq u leedahay inaad codsato magdhow khasaaraha lacageed ee la xidhiidha dambi nacayb.** Kiis dambiyeedka inta lagu gudo jiro, adiga oo ah dhibbanaha waxaad xaq u leedahay inaad codsato oo xaqiijiso magdhow si loo bixiyo khasaaraha hantidaada; kharashyada caafimaadka, oo ay ku jirto magdhowga kharashyada macquulka ah ee latalinta; mushaharka lumay; iyo khasaare kale.

- **Waxaad xaq u leedahay inaad codsato magdhow ama khasaare ay qiimayso maxkamad madani ah, xitaa haddii dhacdadu aysan u qalmin inay noqoto dambi.** Dhacdada nacaybka waxay ka duwan tahay dambi nacaybka sababtoo ah ma dhicin wax xadgudub dambiyeed ah. Tusaalayaasha waxaa kamid ah agacyo aflagaado ah, cay, hadalo xanaf leh, hadalo yasid ah, iyo naanayso cay ah Ilaa iyo inta falalkan aysan gaadhin heer hanjabaad dambiyeed ah. Haddii aad tahay dhibbanaha dhacdo naceyb, weli waxaad xaq u yeelan kartaa inaad dacwad ka gudbiso qofkaas. Maxkamad madani waxay amar ku bixin kartaa qofka ku waxyeeleeyay inuu ku magdhawo, ku bixiyo magdhow tusaale ah ama ciqaabeed, ku bixiyo kharashyada qareenkaaga haddii aad qareen u qortay kaalmada kiis madani, iyo/ama inuu ku siiyo ganaaxyo madani ama magdhow lacageed sabab la xidhiidha ku xadgudubka xuquuqdaada madaniga ah. Waxaad la hadli kartaa qareen (si bilaash ah) oo ku saabsan xuquuqdaada adigoo la xidhiidhaya Waaxda Xuquuqda Madaniga California: Calcivilrights.ca.gov/complaintprocess; (800) 884-1684 (Wicitaan Bilaash ah); (800) 700-2320 (TTY).

- **Waxaad xaq u leedahay inaad bulshadaada ka caawiso ka hortagga iyo ka falcelinta naceybka.** Iskaashiga bulshada ayaa aad muhiim ugu ah ka hortagga iyo ka falcelinta nacaybka. Bulshooyin badan waxay leeyihiin guddiyo xidhiidhka aadanaha ee deegaanka, shabakado ka hortagga nacaybka, ama isbahaysiyo loogu talagalay in lagu dhiirrigeliyo wadahadal iyo in la diyaariyo dhacdooyinka laga yaabo inay kiciyaan dhacdooyin ama dambiyo nacayb. Si fiican, kooxahan waxaa ka mid ah hay'adaha booliska iyo sidoo kale ururada u dooda xuquuqda iyo adeegyada bulshada. Sidoo kale waxaad ka qayb geli kartaa kulamada dadweynaha ee golaha magaalada, guddiga kormeerayaasha degmada, guddiga dugsiyada, iyo hay'adaha kale ee dowladda deegaanka si loo hubiyo in codkaaga la maqlo arrintan muhiimka ah.

## *Kheyraadka Caawinta ee Dambiyada Nacaybka*

- Waaxda Adeegyada Dhibbanayaasha Xeer-ilaaliyaha Guud ee California: 877) 433-9069 ama oag.ca.gov/hatecrimes
- Guddiga Magdhowga Dhibbanayaasha California: victims.ca.gov/victims/localhelp.aspx
- California vs. Khadka iyo Shabakada Nacaybka: 833-8-NO-HATE; (833) 866-4283 ama https://stophate.calcivilrights.ca.gov/s/. Warbixinno waxaa lagu soo gudbin karaa online wakhti kasta ama taleefan 9 a.m. ilaa 6 p.m. Wakiil khibrad leh oo xuquuqda madaniga ah ayaa diyaar u ah inuu ka caawiyo in ka badan 200 luuqadood.
- Waaxda Xuquuqaha Madaniga California: https://calcivilrights.ca.gov/ca-vs-hate-page/

## *Soo Gudbi Dacwad*

- Haddii aad aaminsan tahay inaad tahay dhibbanaha dambi nacayb, soo sheeg hay'adda booliska ee deegaankaaga.
- Haddii aad aaminsan tahay inaad tahay dhibbanaha dambi nacayb ama dhacdo nacayb, ama lagugu takooray, lagugu dhibsaday, ama lagugu ciqaabay, soo sheeg arrintaas Waaxda Xuquuqda Madaniga California: calcivilrights.ca.gov/complaintprocess/.